1B - MAGAN-GELIN, MAGAN-BIXIN

Cali Mudiir: Maanta siddeed iyo labaatan bishii afraad siddeetan iyo afar, mowduuceena dooddii caadiga inoo ahayd waxay tahay Magan-gelin oo ah laba kalmadood oo haddii la isku daro macna sameyneysa ama Maganbixin oo ah qof qof magangelyo siinaya ama dowlad siineysa ama magan bixineysa, soomaaliduna caadey u leedahay adduunkana qaanuun ayaa ka yaalla dowli ah. Adduunku wuu isku raacsan yahay qofkii magangalyo kuugu yimaada in aad magan geliso ama aad bixiso, waa la isku tixgelin jiray, baad baa la isku siin jiray, bixin baa la dhihi jiray, nin cadowgiisa ka cararaaya oo aad badbaado siisay weeye. Mowduucu sidaas ayuu noqon doonaa, haddaba ninba ninka uu ka horreeyo ayuu uga qiyaas qaadan doonaa. Bal hadda Dhegaweynow ku soo dhawoow adigoo mahadsan.

Dhegaweyne: Cali Mudiirow mahadsanid. Magangelyo waa wejiyo badan tahay, korkana waa ka magangelyo. Bixin, dawladuhu ama soomaali marka la is dilayo, nin nin qabtay oo yiri la dili mayo waa magangelyo oo maganbixis baa la yiraahdaa. Qabiil ama degmo u timid degmo kale oo ay col ahaayeen oo tiri magan baan idiin nahay oo markaa ay yiraahdaan magantayada lama taaban karana waa jirtaayoo maganbixin baa la yiraahdaa. Soomaaliduna berigii hore magantu waa la cusleyd, ninkii habeenkaa kuu soo martiya magan ayuu kuu yahay, ninka magantiisa laga qaado ceeb bay ahayd oo gabadhiisa lama guursan jirin waagii hore, waa tii ninkii gabyayey lahaa “Ma magan baa lagaa qaaday mid aad ku ceebowday”, waa ceebeysnaa ninka magantiisa laga qaado, waxaana maqlay laba habeen ama saddex yey hurdadu kaa xaaraansan tahay: habeenkuu meyd ku dul yaal, habeenka magan lagaa qaado, mid kalaa jirtay iyaduna. Maganta soomaalida saasey ula culus tahay, si yaryarna waa kugu soo gashaa oo wixii markaa ku soo hoos galaaba waa magantaada. Ninbaa qabiilo col yihiinoo intii kaloo idil intuu iska qariyo yuu nin u soo gelayaa, ninkaas waa magan, shareecadana kuma wanaagsana ninka magantiisa laga qaado, xagga bani’aadamkuna kuma wanaagsana, magantu waa caynkaa oo wixii kugu taxaluqaba magan ayey kuu yihiin, xitaa xaaskaaga markaad reerkeedii ka soo kaxaysay ee kaaga keentay ayaa magan kuu ah, ninka caqliga lihina magantu waa la weyn tahay ninkaan garaneyninna waxba lama aha. Intaan ka gaaray een garanayey waa taas.

Cali Mudiir: Sida uu u sheegay Dhegaweyne, magangelintu aad bay u ballaaran tahay, sida loo magangeliyo ama macnaha ay leedahayna dadyow badan ayaa nala wadaaga carabtu ay ka mid tahay, Matalan dagaal afartan sano socday wuxuu ka dhashay ayaa la yiraahdaa naag qolo la tiiloo magangelyo ula deggeneyd ayaa nin ka dilay oo fallaar ku dhuftay dagaalkii ka kacay afartan sano ayuu socday sababta dadkaas magantaada ah oo wax la yeelay awgeed ah, soomaalida xitaa dhexdeeda sidaas oo kale dad magan la iska dilay dagaalo xunxun ayaa ka dhasha.

Dhegaweyne: Mid baan ugu noqonayaa, laba nin ayaa wada tiil, lo' bay lahaayeen, ninbaa sac u dhalay, sicii ayuu intuu dibi u sitay sac kale ku sitay, intuu weyshii sicii ogoleysiinayey yaa dibigii dalandalayoo ninkii aqalkiisii galay, hadhow markuu sicii weyshii ogoleysiiyey ayuu damcay in uu dibigii la soo baxoo qasho, markaasaa naagtiisii tiri "Hadde doqonimadaadaan aqaanaayoo dibigaa ku soo magan galay ayaa ninkaa hebel ah kaala bixi doonaa", "War dibiga ii soo saar ayuu yiri" kii kalena "Dibiga aqalkeyguu galayoo waa magan oo lama soo saarayo" ayuu yiri. "War aqalkaaga ma geline waa kii aan hadda sacayga ka sitadaye oo waa keygiyee ii soo saar", "Maya mar hadduu aqalkeygii galay waa magan oo la soo saari mayo" Labadii nin halkii ayaa mid lagu dilay, kan la dilay ayaanan garaneynine, labadii qabiilna kaw ayey isaga siiyeen yaa la yiri. Markaa intaasaan idinku biiriyey.

Cali Mudiir: Aw Daahirow ku soo dhawoow.

Daahir Afqarshe: Cali Muddiirow waad mahadsan tahay, magangalyada soomaalidu sida aad wada sheegteen waa arrin ay ku dheer tahay oo xaggeeda aad iyo aad ugu qiima weyn. Marka ay soomaalidu is dileyso oo bannaanka la isku dooxayo ninka cadowga ah ee kugu soo duulay hadduu aqalkaaga galo laguma dhici karo, adna ma dileysid ninka kuugu soo harana waxba ulama hareysid, ninkuna waa ninkii iska cadowga ahaa arrin ka adagna ma jiro midka caynkaasoo kale ah. Sidaasuu lixaad ugu leeyahay soomaalida sharafteeda mar haddii ninkii cadowga ahaa ee ku dilayey uu gurigaaga soo galay aadan naf iyo maalba waxna uga hareynin. Waxaa kaloo la sheegay waraabe la eryayo oo aan naqaan cadowga uu inoo yahay yaa sidii loo eryanayey guri ku soo hagaagay waana maalin, dadkii eryanayeyna waa ku soo gaareen "waraabaha gurigeyga galay nin magangalay oo kale yuu ii yahay oo lama taabanayo" ayuu yiri ninkii guriga lahaa, waraabihiina isagoo og in haddii dibedda laga helo in la dilayo ayuu aqalkii dhexdiisa iska fariistay, "Aqalka loogu tegi mayo oo markii uu doono ayuu ka baxayaa" ayuu yiri ninkii. Mar haddii waraabihii cadowga ahaaba magan gelisay wax laga sheekeyn karo maaha sida ay soomaalidu ku tahay. Maanta Xabashi ayaan is dileynaa, ninka xabashida ah ee aqalkaaga soo gala ee cadowga ah, meel waa haddii uu gurigaaga soo galay cadowtinimadii hore la illowyoo gurigaaga uu soo galay ayaad adiguna sharaftaada ku ilaalineysaa aadanimada aad wada dhalateen ee aad dad isku tihiinna aad ilaalneysaa daciifnimada uu yahay ee uu ku soo hoos galayna xurnimadeedaad ilaalineysaa, mar haddii xabashigii aqalkaaga soo galayba aadan dileynin kii soomaaliga ahaa ee walaalkaa ahaa ee islaamkana ahaa isku dadna aad ahaydeen calamkii idin dhex galay wax fudud buu noqonayaa oo kaa lama dilayo. Halkaa waxaynu ka aragnay qaayaha ay soomaalidu ka gaarsiisan tahay magangelyada isnagana mid tahay.

Haddii aan meelmeel ka taabto oon hoos u soo dhaco waxaa la sheegay, ninbaa ka yimid Burco markaasuu soo rartay awr tiro

badan, dhulkan Mudug yuu soo galay ninkii, waa la weeraray oo xoolihii inta laga dhacay isagiina nabarro lagu dhuftay ayaa la xiray. Isagoo iska xiran xoolihiina la boobayo ayaa gabar tima tidcani isasoo ag taagtay, waxay tiri “Tolow muu yiraahdo safarkaan waxaan u wadaa Maxamuud Gaani oo meesha waayeel ka ah”. Markii xoolihii la dhameystay yaa lagu soo noqday oo la rabay in la dilo markaasuu yiri “Waryaa, wax Maxamuud Gaani yaqaan ma leedihiin?” Maxaad wadaagtaan baa la weydiiyey “Isagaan safarka u wadaa ayuu yiri”, mindhaa waa raggiisii oo miiran. Maxamuud Gaani baa ninkii loo geeyey, ninkii ma haybsan aqoon horena isuma qabin, markaasuu yiri “Mar hadduu magacaygii soo qaaday war ma jiro” gabadhii markii hore sirta u sheegtay ayuu wadaad u yeerayoo yiri ku xir. Dadkii waxay yiraahdeen “Ninkii aanu dili rabnay Maxamuud Gaani gabadhiisii ayuuba u dhisay”. Reerraha uu ka dhashay Axmed weeyey, habeenkii arooska wuu iska yar dhacay, subixii bay kicisoo tiri “Maxaa loo lahaa Iiddoorka waa mamman yahay?”, “Waa mamannahay laakiin shalay nabaradii laygu dhuftay iyo wixii baan la kici waayey” ayuu yiri. Xoolihii la wada keen oo nin waliba wuu is xilqaamay. Ninkii halaa ayuu ku magan galay, gabadhiina wuu la guuray oo guryahoodii ayey ku dhashay laba wiil. Waa soo dhibaan doonatay, intii ay dhibaadda ku soo maqneyd baa labadeedii wiilba dhinteen, kolkaasuu ka daba yimid, wuxuu is yiri soo noqon meyso haddii wiilashii geeridoodii ogaato, wiil buu soo kaxaystay nacas ah, wuxuu ku yiri naagtaa ha u sheegin in labadeedii wiil dhinteen haddii ay ogaato wixii dhaca adigaa qaba. Gurigii buu yimid oo la wanaajiyey, waa hooyee markaasey ku bilowday wiilasheedii, hebel intee la ekaaday, wuxuu ku yiri “Waxa halkaa i soo mariyeyba waa nimankaa qeyladoodii sidey hooyo meeday u lahaayeen ayaan is iri nimanka ma hayn kartid ee hooyadood u doon” oo wuxuu damcay in uu iyada kiciyaa. Iyadooba iska diyaar ah oo waxba aan ogeyn yey kii doqonka ahaa gees ula baxday oo tiri “Waryaa wax waliba oo naf leh in ay dhimanayaan waan ogahaye wiilasheydii haddii ay dhinteen maxaad iiga qariseen oo iigu sheegi weydeen!”, “Dee Axmed baa i yiri qari oo Axmed baan ku dhici waayee waan kuu sheegi lahaa” markaasey dhulka isla dhacday “Ba’ayeey”. Iyadoo barooraneysa ayuu fiidkii xoolihii wax ka soo hooyey, arag in doqonkii lagala baxay hadalkii, ma hadalkalaaba jira. “Naagyahay mid lagu weyn yahay oo waalan baa tahaye, xaggayaga weykii layska daa waha se mooyaane, Axmed Maxamed wabadkaad ogeyd la isma weydiine, Xasan Cali warkiis maqashay oo weyday dunidiiye, Wiilwaalna waagoo baryey bay god u walwaaleene, ilma iidle wadartaad ogeyd waaxid baa haraye, waxaddii Jibriil yare shalaa niman wabaarteene, Warfaa Cumar waddada seyli haad wab leeyahaye, naa anba wiilashii waan jeclaa la ina siiwaayaye, naa wadkan aniga ii soo socda aan waxadna dhaafeynin, naa weelka caana iga sii wiilashaa ba’ae ” ayuu yiri. Kolkuu gabaygaa mariyey oo adduunkii uga warramay yey miyirsatay oo tiri waa wax adduunkaba ku saabsan, raggii ay wada tiqiin ee adduunka ka talinayey. Maxamuud Gaani iyo arrintiisii halkaasey ku dhacay. Waxaa kaloo dhacday nin reer Galgaduud ah inuu haweeneydiisii

safar u dhiibay, awr tira badan bay wadataa goolal ah baqalna waa ku joogtaa Berbera ayey tagtay, raggii baayacmushtarka ahaa ee Berbera ka talinayey yaa wixii xoola ah iska qaatay, baqalkiina reerkoodi ayuu u dirsaday haweeneydiina Cadan ayuu la qabtay. Sheikh Maxamed baa garanayee ninkii Faarax Afcad la oran jiray walaalkii weeye oo waa Tarabi, Xasan Dhiillo, Tarabi baa la yiri naagtii Cadan baa lala qabtay wixii awr ay wadatay iyo alaabtii iyo wixii ay gool wadatay ee ay soo madoobeysan jirtay iyo naagtiina ka samir, markaa Tarabi baa gabyey “Safar iyo socdaal iyo si kale saan isku helnaaba wallee Samatar waxaynu isku nahay labaadduun saran” ayuu yiri, ninkii naagteydii iyo xoolihii dhacayow adduun baynu ku wada nool nahay si Ilaahay nagu kulmiyaba. Naagtii reerihii ay ka dhalatay oo dega Wardheer iyo meelahaa ayuu col fardo ah ku kiciyey, dhulka waa kii kala go’naa wagii hore geelii raadkiisii markay arkeen ayey fardihii ka degeen oo meel kayn ah ku qariyeen intay xakamihii ka bixiyeen. Iyagoo sugaya ayuunbaa xagga dambe waxaa laga maqlay sanqadh, dib uun baa loo eegay mise waa boqol rati oo raran, naagtii baa ku jirta oo baqalkeedii ku joogta ninkii dhacaybaana la socda, iyadiibaa soo waashay oo tiri reerahayaga aan soo aragno, waana reerahoodii geela lagu duulaanka tegey, wixii uun baa loo kal wareegoo waa la qabtay, waa la wareystay “Naa maxaad sheegatay”, “Nabad”, Samatar mee?” “Waa kan”, “War Samatar waxaan ahay Tarabi Xasan Dhiillo, ninkii ku yiri safar iyo scdaal iyo si kale saan isku helnaaba wallee Samatarow waxaan nahay laba adduun saran, sow kumaan oran, sow adiguna waagaa gabay iima aadan soo dirin oo maadan oran Safar iyo socdaal iyo si kale say u noqotaaba wallee Tarabiyow waxaan nahay laba toloo kala fog, oo taawadeenaan arkaaye taawo iskuma keenno sow maad oran, hadduunbaa teydii Rabbi run kadhigay oo waa i kan. Hadda horta ha baqanin oo kuma dilayo oo kaa abaal gudan mayo.” “Ilaaha naagteydii iyo xoolahaygii iyo baqalkeygii, boqol rati yaan xisaabsanayay iyo boqol kaloo dusha ka saran oo xoolo ah oo dabal (double) ka soo dhigay maan ka abaal dhacayaa, kuwanna Ilaahaa innaga baajiyey aan geeloodii booby lahayn ee la innagu leyn lahaa, Samatarow mar haddaad aniga magan ii tahay kuma dilayo, naagtan haddaad quruxdeeda aragatay kuwa sidaa u cadcad ayaa reeraha ka buuxa oo walaalaheedaad heli lahayd ee ninnimadaada ku guurso, meeshii xeebta ahayd intaad u fariisato hadba naag nin qabo aad dhacayso waa doqonnimee, aniga xageygana ammaan ayaad ka tahay xoolihii ku geyn lahaa Berberana waan ku siinayaa ee aad jicsiman lahaydeen,.

Ninbaa fardo ka soo kaxeystay Nugaal wuxuu keenay Doolo farduhu waa iib, nimanbaa ka iibsaday, markii fardihii lagala wareegay oo geel been been ah la tusay ayaa la yiri war naga tag waxba ku siin meyno e. Wuxuu u yimid nin madax ah, wuxuu yiri nin caynkaasaan ahay, fardaan watay oo la iga iibsaday dabadeedna la ii diiday in geelii la i siiyo, ragga dhulka ka taliyaad ka mid tahaye ii dhici xoolahaygakan. Soomaalidu qareen ayey inku soo toosisaa ama xiditinimo, “Wax aan nimankaas kaaga sokeeyo ee aad isku tihiin ee aad i leedahay ee iigu baadi doon xoolahaygii

ma haysaa?", "Haa oo faraskayga iyo faraskaaga ayaa faras wada dhalay" buu yiri, sheekadaa waa la wada yaqaannaa ee waxaan la wada aqoon qisada ay ku soo baxday. "Wallaahi waa runtaa oo faraskeyga in faras hebel dhalay oo dhulkiinana ka soo jeedo waan aqaan" ayuu yiri, " mar haddii isku faras dhalay waan kuu hiilinayaa" ayuu yiri. Soomaalidu halka ay sharafta ka ilaaliso iyo qareenimada bal dadnimo daayoo nimanka ku hiilliyey farskeyga iyo faraskaaga ayaa faras wada dhalay ee ay arrintu ku socotay.

Nin baa reero ay ilma adeer labaad ahaayeen ayaa la wada colloobay, ninkii ayaa waxaa ka muuqatay murugo aan taasoo kale jirin. Wiil uu dhalay ayaa canaantay aabbihii "Aabbe waxaad tahay laba iyo soddon jir, lix iyo toban wiil ayaad leedahay, anigaa wiilkaagii curad ah, lix iyo toban gu' ayaad iga weyn tahay anna lix iyo toban jir ayaan ahay oo haddaa wiil ii dhashay" reer hodan ah weeyoo Ilaahay wax u dhiibay, "ma adaan ninka hebel la yiraahdo iska celineyn ama annagaan wiilashiisa ku tooseyn, raggaan manta wada colloobayna adaa u wiilala badan oo nin dhallinyaro ah oo kula wiilal egi ma jiro, nin waayeel ah ma ihid oo adaa u walaala badan adaana u adeero badan", ragguna intaasuu isku jiraa gebigooduba, intaas waa inta is raacsan inta kalena intaa in la eg bay isku jiraan, wuxuu yiri "Waanad garan wiilyahow, mar haddaan u wiilal badnahay oo u walaalo badnahay oo u adeero badnahay ninka baaba'aya waa aniga, kuwa kale eel ala colloobayna waa garabkeygii, ninka meesha ku baaba'aya ee ladnaanta waayaya waa aniga". Dagaal ayaa la isku qaaday, laba wiil uu dhalay ayaa la dilay, markaasaa la yiri waa hebel iyo hebel, markaasuu qosol ku dhuftay, markaasaa la weydiiyey waa maxay qosolku illeen nin faraxsan ayaa qoslee, "Kani waa qosol gariir oo maalinkii horaan ooyay oo aan waxakan garanayey, manta ma ooyayo oo foolxumadaan garanayey" ayuu yiri.

Nimankii kalaa laga xoog roonaaday, maalintii dambaa afar nin soo orodayoo habeen bay isku soo beegeen isagii aqalkiisii, isagoo hurda oo habeenkii kala baran yahay ayey aqlkii isku shubeen, markaasey toosiyeen isagii, "War waa maxay?" "Waa reer hebel oo dhan, mar haddaan hebel iyo hebel iyo hebel iyo hebel nahayna reer hebelkii waa dhan yahay ee noo tali, oo waxaan is niri isagoo aqalka haweeneydiisii la hurda ku qabta, in aad naga taqalisto ama aad na nooleyso annaga iyo waxaan ka nimidba" Nimankii oo aqalkii jooga ayuu subaxdii u tegey kuwii kale oo ku yiri nimankaas oo dhan ayaa aqalkeyga jooga. Taladii waxay noqotay afar faras ha la siiyo niman aan looga baqeyna ha lagu daro ilaa ay degmadeena ka baxayaan. Haddaan nimankaa aqalkaa soo gelin colaadda halkaa ayey ka socon lahayd. Ninkaa caqiiba taliska ahaa manta dalkaa uu ka dhashay oo dhan isagaa u dad roon, Anigu intaa yar ayaan ka gaaray Caliyow waan kugu soo celiyey adiga lee waaye.

Cali Mudiir

Markaan ka hadleyno caqiibatalis ama bixinta ninkii waxaan ku soo xusuustay aayad quraana oo ah oo micnaheedu yahay "Xumaanta iyo samaantu islama sinna, midda xun midda fiican ku beddel oo midkii cadaawa idiin dhaxeysay aad aragto isagoo saaxiib iyo wadaay midka ugu wanaagsan ah" Sidaas awgeed ayaa

qaanuunka dawligaahu xuquuqda magangelyada ayaa dawlad kastaahu ku dhigtay, soomaaliduna waxay ka mid ahayd bulshooyinka adduunka macna weyn ugu fadhiyo bixinta cadowgaadaba ha ahaadee ninkii ku magangala, sidaas ayuuna mowduuceenna qiime gaar ah u leeyahay maantay. Bal hadda Salaadow wixii aad ka xusuusato inoo faahfaahi waadna mahadsan tahay.

Salaad — Mahadsanid Caliyow, Wallaahi anigu hadda meel aan ka bilaabo ma garanayo maxaa yeelay hadalkii raggii horaa leystay, balse waxaan badneyn baan ku darayaa anigu. Horta sheeygan magangelyada ahi waa wejiyo badan yahay, dhowr nooc ayuu u kala baxaa, mid waa laba qabiilo oo colloowday, nin hilib kugu soo raacay oo la magangeliyaa waa jiraa, nin aqoon loo nabadgeliyaana waa jiraa, nin culimo ahaan lagu nabadgeliyaa waa jiraa, marka dhowr weji ayey leedahay, nin saaxiibtinimo ninkaas kula baxaa way jirtaa, nin sidiisa loo sii daayo oo la yiraahdo ninkaa nin la dilo maahin waa jiraa. Waxaa jiray hadda ka hor nin yaa col soo watay, ragbaa la qabtay, markaasaa la yiri “war Axmed Saayil raggaas see loo gala?” Markaasuu yiri “War Ilaaha godladey anigu ma gaagixin karo”, macnuhu waxa weeye nimanka laaya, raggii waa la dilay, Axmed Saayil maalinkii dambaa la qabtay waxaa la yiri “War Axmed Saayil warkaa ma tiri?”, markaasuu yiri “Seen u oran oo hadda idinka sow idiinma godlana”, waxaan u maleynayaa halkan rag badan baa Axmed Saayil yaqaan, nin la oran jiray Jaamac Faradal yaa yiri wax walba waa iga xaaraan in aan maanta Axmed Saayil la dileynin warkaas inuu geeyo oo sheego maahee. Waa la baxshay oo la sii daayey Axmed Saayilna wuu tegey, horta labadii qabiil ee sidaa isku ahayd sidaan maqlay toddobaatan sano dagaal kama dhex dhicin. Axmed Saayil markuu xagga tegey warran baa la yiri “Nin iga roon yaa i helay” ayuu yiri.
Waxaa jira soomaalidu waagii hore intaan hadda la baloobin oo hadda adduunyadu xumaanin, ninka safarka ah iyo ninka haddii uu jid ku joog yahay lama taaban jirin oo nabadgelyo gaar ahaa la siin jiray, waxaa la oran jiray ninka safarka ah oo qolo kale dhex jooga, ninkaan keligii ah see loo taaban karaa ayaa la oran jiray, ama laba qolo ayaa colloobeysa, nin waxaa jira inan la yaal ah ama cidda dhex deggen, lama taaban jirin oo soomaalida waxay ka ahayd mamnuuc. Soomaalida magangelyada annagu intaan soo gaarnay ayey ugu dheereyd, wixii aan soomaali ahayna idiinkama sheekeyn karo, laakiin soomaalida sidaasaa magangelyadu ugu dheereyd. Caliyow intaasaan anna ka gaaray.

Cali Mudiir — Waxaa la yiraahdaa masaabaxa ama qofka markaad bixineyso waa markaad awood leedahay oo qofka marka aad ka awood badan tahay ayaad bixin kartaa ama dhaafi kartaa, sida aad adiguba hadda tusaalaha aad u keentay Salaadow uu lahaa nimanku way iga fiicnaayeen oo ah waa i dili kareen imana dilin oo isaga laftigiisu waa qirtay. Hadda kaalinta Xaaji Maxamed Liibaan ayaa leh oo isagu dhulka dhibaatadaasu ka dhacdo aad u yaqaan, ama dhaqanka soomaali taariikh ahaan u yaqaan, suugaan iyo gabay ku

yaqaan, diin ahaanna u yaqaan oo kaalimo badan isagu buuxiya. Xaaji Maxamed Liibaanow ku soo dhawoow.

Xaaji Maxamed Liibaan

Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Caliyow mahadsanid, waxaan ka hadleyno waa sheygii amaanagelinta ahaa oo dadkii laga itaal roon yahay in la amaangeliyo oo ay ku dhalato amaangelintaasu natiijo nabadeed oo loo aayaahu sheygaa jarriimada ah ee labada qolo dhex yiilay haddii shey nabad ihi soo galo suuragal waxaa ah wixii hore wax ilowsiiya in ay meeshaa ka dhacaan. Amaangelinta soomaalidu waxay yiraahdaan maahmaah waa diin shanaad oo ay yiraahdaan soomaali been waa muddacdaa beense ma maahmaahdo, waxay ku maahmaahaan "*martidaa waa intaad soori kartaa magantaana waa intaad badin kartaa",* oo macnuhu yahay waxaa magan kuu ah waxa aad barin karto, haddii aad cid keliya oo meel fadhisa tahayna boqol nin ma soori kartid, laakiin afar nin ama toban nin in aad soortaa waa suura gashaa, halkaa waxaa laga garanayaa itaalkiisa in ka badan qoysku in aysan u martiyi Karin, magantaana waa intaad barin kartaana waxaa laga kasay laba jeesh oo birta isku wata anigey magan ii yihiin nin ma dhihi karo oo waa ka baxsan tahay magantii uu barin hayey. Maganta waa shey rukni ah oo soomaalinimada ku weyn ama islaanimadaba ku weyn weeye. Waxaa jiray jaahiliyaddii carabta dhurwaa wuxuu ka ba'shayba in niman ku erdeeyeen, isagoo cararaya in uu guri galay, ninkii guriga lahaa ayaa soo baxay oo qalabkiisa soo qaatay oo yiri amaanada gurigeyga soo gashay ma dili kartiin oo ay ka laabteen oo hal u lisay oo caana u barxiyey oo afka u geshay ileen beriga oo dhan baa la raacdeynayee. Markuu ninkii seexday ayuu dhurwaagii ninkii caloosha ku dhegey, dadkii baa arkay oo la qeyla dhaamiyey, bahalkii markaa wax buu ba'shaye wuu cararay, waa la soo dilay, meeshii baa la keenay, ninkii raacdeeyaa gabyey...